KU SOO DHOWOOW WAXBARASHADA HORE!

WAXBARASHADA HORE (ESIOPETUS) WAXAA AY BILAABANAYSAA KHAMIISTA 11.8.2022, WAXAANA AY DHAMMAANAYSAA 2.6.2023.

Vantaa
Vanda

KU SOO DHOWOOW WAXBARASHADA HORE!

Waxbarashada hore (esiopetus) waxaa ay bilaabanaysaa khamiista11.8.2022, waxaana ay dhammaanaysaa jimcaha 2.6.2023.

Waxbarashada hore waa qeyb ka mid ah wadada waxbarashada ee socon doonta inta qofku uu nool yahay, taasoo ka bilaabanaysa guriga iyo xannaanada, waxaana ay waxbarashda hore kaddib u sii gudbeysaa waxbarashada aasaasiga ah. Hadafka laga leeyahay waxbarashada hore waa sidii hore loogu dhigi lahaa horumarka iyo shuruudaha waxbarshada ee ilmaha, iyo sidoo kale in la xoojiyo xirfadaha bulshannimo ee iskukalsoonaanta nafsad ahaaneed ee ilmaha, arrimahaas oo ay si wadajir ah u sameynayaan xannaanada iyo qoyska. Waxbarashada hore waa mid waajib ah, hadaf leh islamarkaana ku saleysan qorshaha waxbarashada. Ilmo walba waxaa si gaar ah loogu diyaarinayaa qorshe waxbarsho, kaasoo si wadajir ah loola diyaarinaayo ilmaha iyo waalidka.

Inta lagu gudajiro waxbarashada hore, ilmuhu waxaa ay tijaabinayaan oo baranayaan arrimo cusub oo ay isla qaadanayaan carruur iyaga la da'ah. Waxbarashada hore waxaa ay ka kooban tahay waxbarasho xaqiiq ah oo si ballaaran loo hirgelinaayo, taasoo ay sal u yihiin waxyaabaha ilmuhu uu xiiseynaayo iyo ahdaafta guud ee waxbarashada aasaasiga ah. Waxbarashada hore ee aasaasiga ah waxaa illaa iyo xad ilmuhu uu wax ku baranayaa qaab ciyaar ah, iyadoo ciyaartuna ay mar walba kaqayb tahay waxbarashada hore ee aasaasiga ah. Ciyaarta kasokow waxaa intaa dheer oo

ilmaha wax lagu baraayaa qaabab tijaabbo iyo howlqabad ah oo lagu ogaanaayo khibradaha ilmaha, islamarkaana lagu xoojinaayo rabitaankiisa waxbarashada.

Xusuuso diiwaangelinta ilmahaaga ee waxbarashada hore ee aasaasiga ah, muddada u dhexeysa 5.1.-30.1.2022!

- Waxaad qaab elegtoroonig ahaan ah uga diiwaangelisaa adeegga VaSa, ama waxaad codsiga dhigtaa xannaanada ilmahaaga.
- Goobaha ay ka socoto howsha waxbarashada hore waxaad ka hubin kartaa bogagga internetka ee Vantaa: vantaa.fi/esiopetus
- Go'aanka waxbarashada hore waxaa laga fiirin karaa adeegga VaSa toddobaadka 14.aad.

Waxbarashada hore ee aasaasiga ah waa lacag la'aan, waxaana qayb ka ah cuntada

Waxbarashada hore ee aasaasiga ah waxaa la qabanqaabiyaa maalmaha shaqada ee iskuulka, muddo afar saacadood oo maalintii ah. Kaqabyqaadashada waxbarashada hore ee aasaasiga ah waa mid lacag la'aan ah, waxaana ku jira raashin maalin walba ah. Waxbarashada hore ee aasaasiga ah waxaa dheer oo ilmuhu uu xaq u leeyahay in uu helo daryeel xannaano oo la xiriira nidaamka barbaarinta hore, kaasoo ah mid lacag ah. Baahida ah barbaarinta hore ama xannaanada lagu dhammaystiraayo inta ka dhiman waqtiga waxbarashada hore, waxaa diiwaangelintiisa isku mar lala samaynayaa kan waxbarashada hore.

Kala doorashada luqadaha waxbarashada hore ee aasaasiga ah

Inta ay socoto mudada sannadka ah ee waxbarshada hore, waxaa si gaar ah loo baran doonaa dhammaanba luqadaha iyo dhaqanka kooxda ay ka kooban yihiin ilmaha ku jira waxbarashada hore ee aasaasiga ah. Waxaa si wadajir ah loo baran doonaa qaar ka mid ah kalmadaha ugu caansan ee luqadaha kooxda waxbarashada hore ee aasaasiga ah. Sidoo kale marka la dejinaayo qorsheynta iyo hirgelinta waxbarashada hore, waxaa laga faa'iideysan doonaa khibradaha qoysaska ee la xiriirta aqoonta luqaddooda iyo halka dhaqankoodu ka soo jeedo.
Haddii aad doonayso in ilmahaaga muddada waxbarashada hore ee aasaasiga ah loo dooro oo xoogga loo saaro dhanka luqadda, waa suuraggal in degmada Vantaa laga codsado:

- Waxbarashda hore ee aasaasiga ah ee lagu xoojinayo dhanka luqadda ingiriiska
- Waxbarashada hore ee aasaasiga ah ee luqadda iswidishka oo si qotodheer loo qaa-danaayo
- Waxbarashada hore ee aasaasiga ah ee luqadda ingiriiska ee xooggan

Wixii faahfaahin dheeraad ah fiiri cinwaanka: vantaa.fi/kaksikielinenesiopetus

Wadashaqeynta iskuulka lala yeelanaayo

Ilmuhu goor hore ayuu soo indha-indhayn doonaa nidaamka shaqo ee iskuulka iyo degaanka waxbarasho, inta uu ku guda jiro xilliga waxbarashada hore. Magaalada Vantaa goob walba oo ay ka socoto waxbarashada hore ee aasaasiga ah, waxaa ay wadashaqeyn la leeyihiin iskuul ka mid ah iskuullada waxbarashada. Arrinkaan waxaa loola jeedaa tusaale ahaan, howlo ay si wadajir ah u sameynayaan carruurta ku jirta waxbarashada hore ee aasaasiga ah iyo ardeyda bilaabeysa fasalka koowaad ee waxbarashada iskuulka, iyo sidoo kale booqashooyin lagu tagaayo iskuulka. Xilliga gu'ga ee waxbarashada hore ee aasaasiga ah ayaa waxaa warbixinta carruurta xannaanada waxaa loo wareejiyaa iskuulka, iyadoo arrinkaasna lala kaashanaayo waalidka. Ujeedada laga leeyahay arrinkaas waa sidii loo sugi lahaa sii socoshada caawimaadda waxbarashada ee marka iskuulku uu bilowdo, iyo in arrimuhu ay ku socdaan waddo dhab ah oo ka bilaabanaysa waxbarashada hore, taasoo soconeysana illaa iyo iskuulka.

Ku soo dhowaada booqashada isbarashada!

Dhammaanba xannaanooyinka lagu qaato waxbarashada hore ee aasaasiga ah ee magaalada Vantaa, waxaa ay diyaariyaan toddobaadka 20-aad booqashooyin isbarasho oo qoysaska loogu talaggalay. Xannaanooyinka ayaa waalidka ku wargelin doona xilliga munaasabadahaasi isbarashada la qabanaayo.

Xirfadaha waxbarashada luqadda finishka ee loogu diyaarinaayo waxbarashada aasaasiga ah

Carruurta ay dhaleen dadka ajaanibta ah ee waddankaan u soo guurey waxaa loo qabanqaabiyaa waxbarasho loogu diyaarinaayo tacliinta aasaasiga ah, kuwaasoo aysan xirfadda luqaddooda finishku aanay ahayn mid ku filan waxbarashada kooxda waxbarashada hore ee aasaasiga ah.

Waxbarashadaan diyaarinta ah ee ee loogu talaggalay waxbarashada aasaasiga ah waxaa la qabanqaabiyaa shan saacadood maalin walba oo ka mid ah maalmaha iskuulka la dhigto. Afar saacadood oo ka mid ah waxbarashada waxaa ay ka qayb tahay waxbarashada hore, waxaa intaa dheer hal saac oo carruurta laga kala dhigaayo kooxo yaryar.

Waalidiinta iyaga ayaa ilmaha u diiwaangelinaaya waxbarashada hore, kaddibna waxaa suuragalnimada ah codsiga ku saabsan waxbarashada diyaarinta ee waxbarashada aasaasiga ah si wadjir ah uga heshiinaaya waalidka, goobta waxbarashada hore iyo iskudduwaha arrimaha dhaqanka iyo luqadaha.

Vantaa
Vanda